
spl.org




## Booqashada Khadka Talefoonka ah

Si aad wax badan uga ogaato Maktabada Dhexe “Central Library”, wac 206-686-8564 oo gali lambarka (1-20) ee ku qoran calaamadda joogsiga safarka ee taleefanka gacanta, ee ay ku xigto #. Joogsiyada booqashada ee heer kasta waxay ku qoran yihiin gadaal.

Ka eeg farshaxanka:
**www.spl.org/CentralArt**

# Central Library | Hagitaanka Shakhsi ahaaneed ee Booqashada

spl.org

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Central Library booqo **www.spl.org/Tours**

**Xaqiiqoyinka Dhismaha**

- Central Library waxaa la furay Maayo 23, 2004 waxana nashqadeeyay Rem Koolhaas (Xafiiska Naqshadeynta Magaalada, Netherlands) iyo Joshua Prince-Ramus (LMN Architects, Seattle)
- Waxay leedahay 11 heerar ah oo daboolaya 363,000 fiit oo laba jibaaran oo leh ku dhawaad 10,000 daaqadood

Goobaha Lagu Istaago ee Booqashada 1-8

**Dabaqa 1** waa goobta aad ka heli doonto Buugaagta Luqadahayaga Aduunka iyo Luuqada Ingiriisiga. Waxaad booqan kartaa Xarunta Caruurta si aad u hesho buugaag, buugaagta maqalka ah iyo DVD-yada caruurta ama Barnaamijka Helitaanka Loo Siman yahay ee Maktabada "Library Equal Access Program Lab, LEAP Lab" si aad u isticmaasho tignoolajiyada la heli karo. Shaqaaluhu waxay kaa caawin karaan inaad hesho kaarka maktabada.

- Farshaxanistaha dharka ee Seattle Mandy Greer ayaa dhamaystirtay sadex shaqo oo loogu talagalay Faye G. Allen Children's Center oo ku salaysan sadex mawduuc oo sheeko ah: "The Phoenix Fairy," "Babe the Ox" iyo "The Magic Grove."
- "The Fountain of Wisdom," oo ku yaal wadada afaraad ee uu qoray farshaxamiistaha maxaliga ah ee George Tsutakawa.
- Farshaxanistaha Ann Hamilton waxay ku samaysay 556 xariiq oo qoraal ah oo 11 luuqadood ku qoran sabuuradaha alwaax ah, kuwaas oo u higaadinaya, gadaal, jumladihii ugu horeeyay ee buugaagta ku qoran luuqadahaas.
- "Northwest Screen" ee ku taal darbiga gadaasha masraxa waxaa sameeyay koox farshaxaniista oo lamaane ah James H. FitzGerald iyo Margaret Tomkins.

Goobaha Lagu I stagao ee Booqashada 9-10

**Dabaqa 3** waa Qolka Fadhiga halkaas oo aad ka heli doonto Buugaagta Sheekooyinka Khayaaliga ah ee loo habeeyey qeybta sheekada iyo sidoo kale DVD-yada. Waxaad booqan kartaa xarunta dhalinyarada si aad buugaag ugu heshid dhalinyarada ama waxaad fadhiisan kartaa goobta wax lagu cuno si aad cunto fudud u cunto. Hel farshaxanka biyaha hoostooda ku qarsoon oo soo dhig #SPLselfie

Goobaha Lagu Istaago ee Booqashada 11

**Dabaqa 4** waa Dabaqa Cas halkaas oo aad ka heli doonto qolal shirka oo loo balansan karo munaasabadahaaga gaarka ah www.spl.org/CentralMeetingRooms

- Waxa gidaarada, saqafka, sagxadaha iyo jaranjarooyinka ku yaal 13 har oo rinji cas lagu injiyeeyay oo ay ku qoran yihiin gidaarka qoraalka 'Robert's Rules of Order'.
- Fiiri muuqaalada dambe ee muuqaalka sawirka Tony Oursler ee "Braincast".

Goobaha Lagu Istaago ee Booqashada 12

**Dabaqa 5** waa qolka isku dhafan oo aad ku isticmaali karto kombuyuutar, daabac, nuqul samaysashada, fakis ku dirsan karto oo aad ku turjumi karto dhukumiintiyada. Shaqaaluhu waxay kaa caawin karaan tiknoolajiyada, adeegyada bulshada iyo su'aalaha kale.

- Farshaxanka dhijitaalka ah ee George Legrady, "Making the Invisible Visible," waxay soo bandhigaysaa macluumaadka wakhtiga dhabta ah ee ku saabsan alaabta la hubiyay.
- Farshaxanka Frank Okada "The Guardian" ee ku yaal jaranjarada madow waxaa loo sameeyay si loogu sharfo walaalkii Frank, John Okada, maktabad hore iyo qoraaga "No-No Boy".

Heerarka 6-9, Goobaha Lagu Istaago ee Booqashada 16-20

**Dabaqa 6** waa qayb ka mid ah Buugaagta Jaldigooda balaastiga lagu xiro halkaas oo aad ka heli doonto Joornaaladayada iyo Wargeysyada iyo Daabacaada Dawlada. Isticmaal akhristaha Microfiche si aad u aragto buugaagta.

**Dabaqa 7** waa qayb ka mid ah Buugaagta Jaldigooda balaastiga lagu xiro halkaas oo aad ka heli doonto buugaagta aan ahayn sheekooyinka khayaaliga iyo DVD-yada. Waxaad booqan kartaa Xarunta Ganacsiga iyo Xarunta Kuwa aan Macaash doonka ahayn iyo Xarunta Kheyraadka Shaqada ama waxaad balan ka qabsan kartaa Zine Room si aad u aragto Buugaagta Zine. Hel farshaxanka mawduuciisu yahay hawada ee qarsoon oo soo dhig

**Dabaqa 8** waa qayb kamid ah Buugaagta Balaastiga lagu jaldiyeeyo halkaas oo aad ka heli doonto Buugaagta aan khayaaliga ahayn, faylalka muusiga iyo faylalka farshaxanka. Waxaad booqan kartaa qeybta sawirada si aad u aragto bandhig ama mid kamid ah buugaagta Qolalka Dhaqanka

**Dabaqa 9** waa qayb kamid ah Buugaagta Balaastiga lagu jaldiyeeyo halkaas oo aad ka heli doonto Buugaagta aan khayaaliga ahayn iyo hagayaasha. Booqo qolka Khariidadda si aad u aragto Khariidadaha la soo aruuriyay, ka codso deegaanka Qolka Qorayaasha ama balan ka qabso si aad u baarto Asalka laga soo jeedo.

- Galka sawirada "Bibliotopia" ee Deborah F. Lawrence ayaa ku dhex yaal Qolka Khariidada. waxaana ku jira hadal uu qoray Jorge Luis Borges "Waligay waxaan qiyaasi jiray in Janada ay noqon doonto nooc kamid ah maktabada."

Goobaha Lagu Istaago ee Booqashada 13-15

**Dabaqa 10** waa goobta aad ka heli doonto Buugaagta Qolka Seattle ee dhaqanka iyo taariikhda deegaanka. Ka qabso balan Qolka Seattle si aad u aragto buugaagta gaarka ah ama booqo Qolka Akhriska si aad u hesho goob degan oo wax lagu akhristo, laga shaqeeyo ama wax lagu barto. Soo hel muuqaalada ugu sareysa si ay kaala qurxoonaadan Qolka fadhiga.

- Lynne Yamamoto ayaa sameeyay "Of Memory," oo ah farshaxan kamid ah buugaagta kaararka qadiimiga ah ee laga sameeyay dun balaatiiga ah ee polyester.
- Shiva II ee uu qoray Frank Okada waa shaqo weyn oo Cilmi ahaaneed oo ugu horayn isticmaalaya casaan, buluug iyo huruud la weyneeyay oo soo jiidasho leh.